Somaliland Societies in Europe
Connecting Somaliland Communitites

# Muuqaalka Qofeed ee Diifta Abaarta Somaliland 2016/2017



*Dr Maxamed Obsiye*
*London*
*UK*
*2017*

# Hordhac

Dallada SSE oo kulmisa jaaliyadaha reer Somaliland ee ku dhaqan dalalka Yurub waxay halkan idinkula wadaagaysaa war-bixin uu innoo soo diyaariyay Dr Maxamed Obsiye oo xubin ka ah dalladdani. Waa war-bixin faahfaahin guud innaga siinaysa xaaladda adag ee ay ku sugan yihiin dadkeenna ay abaartu ku dul habsatay.

Dalladu waxay halkan mahadnaq u soo gudbinaysaa Dr Obsiye oo war-bixintan ka diyaariyaya muddadii koobnayd ee uu ku sugnaa Somaliland. Sidoo kale waxa isna aannu u mahad naqaynaa sawir qaadaha Axmed Kadleye oo isma ah xubin ka tirsan dalladda imikana hawlo shaqo ugu sugan dalkii hooyo.

Waxaannu ku boorrinaynaa dadkeenna qurbo-joogta ahi inay ka qayb qaataan gurmadka loogu jiro sidii loo samata bixin lahaa dadkeenna ay abaartani wax yeellaysay. Wax-qabadkeennu wuu xaddidan yahay ee waxaannu aanu Ilaahay ka rajaynaynaa inuu abaarta innaga dul qaado.

Allah ayaa mahad leh

Guddiga Fulinta SSE

# Tusmo


| Faahfaahin | Bogga |
|---|---|
| -Diifta Abaarta | 4 |
| -Soo-Guurto | 4 |
| -Geeddi naf la caari ah | 6 |
| -Ciirsi la’ | 7 |
| -Wax roob sheegaya? | 9 |
| -Raq-la-soo-guur | 10 |
| -Macalluuli waa ina daan weyne | 12 |
| -Beesha la hab-dhaqan sooco | 13 |
| -Haddii aad tahay qurbo joog, maxaad dadkaa u qaban kartaa? | 14 |

# Diifta Abaarta 2016/2017

Abaarta ka dhacda Geeska Afrika waa masiibo dabiici ah oo soo noq-noqota. Qiyaasuhu waxay tilmaamayaan in saddexdii sannadoodba abaari gobolka ka dhacdo; tobankii sannadoodna mid macalluul keentaa dhacdo. Abaarahani, xagga cilmiga, waxa inta badan ay la xidhiidhaan is beddelka ku yimaadda cimilada ee loo yaqaan El Nino.

Abaartu waxa ay kal hore ka dhacday gobollada galbeed ee Jamhuuriyadda Somaliland, haddana waxay ka taagan tahay kuwa bariga oo ay caam yeeshay gobollada Toghdheer, Sool, Saraar, Xaysimo, Sanaag iyo Saaxil. Abaaraha imiku waxa ay kuwii hore kaga duwan yihiin laba shay: 1) doorka is-gaadhsiinta casriga ah iyo 2) isku-gurmasho. Isgaadhsiinta casriga ahi waxay nasiib wanaag sahashay in dhibaatooyinka dabiiciga ah ee dadkeenna la soo darsa si deg-deg ah looga war helo, taasina waxa ay keentay in la is baraarujiyo oo la is taakuleeyo.

Waxa aan doonayaa in aan halkan idinkula wadaago war-bixin ka hadlaysa saamaynta iyo wax yeelada bini-aadam ee ay abaartani leedahay. Waxa aan war-bixintan ka soo diyaariyay socdaal aan angu iyo cilmi-baadhayaal Jamhuuriyadda u dhashay aannu bishii Diisambar 2016 dhexdeedii ku marnay deegaannada ay dadka abaaruhu soo baro kiciyeen u hayaameen. Nasiib darro waqtigu noomuu saamixin inaannu tagno deegaannada ay abaartu ku habsatay. Baaxadda masiibada abaartu waxay ku taallay wejiyada dadka aannu kula kullannay goobaha loo soo baro kacay. Waxannu rajaynaynaa inaad qoraalkan ka fahamto xaaladda nololeed ee dadka haysata. (Waxa igu maqaala ah in abaartii iyo saamaynteedii ka sii dartay intii aan waddankeennii ka soo maqnaa, oo imika ku siman laba sitimaan.)

## Soo-Guurto

Dadka ay abaartu soo baro-kicisay waxay isugu yeedhaan ‘Soo-Guurto’. Waxay daadsan yihiin – waxay ila tahay in ay habboon tahay in aan isticmaalo ereygaa daadsan yihiin – dhammaan deegaannada galbeedka Jamhuuriyadda. Waxay dadkaasi badankoodu ka kala yimaaddeen deegaamada hoos yimaadda Balligubadle, Sallaxley, Ina Guuxaa, Oodweyne, Banka Tuuyo, Xaaxi, Hara Sheekh, Duruqsi iyo meelo kaba sii bariyeeya. Inkastoo aannaan annagu indhaha saarin, waxa na loo sheegay Soo-Guurto ka soo hayaantay gobollada Sool iyo Sanaag-Galbeed. Tirada guud ee Soo-Guurtada lama hayo, waayo lama diiwaan geliyo. Waxase jira guddiyo abaareed oo Jamhuuriyadda ka hawl gala oo loogu tagi karo tirooyin fikir lagaga qaadan karo inta ay le’eg tahay ummadda soo hayaantay. Waa guddiyo ku shaqeeya tabarruc oo u badan ganacsato iyo culimo — waa aamin.
Tiro koob la’aanta rasmiga ahi waa qayb ka mid ah dhibaatada. Wasaaradaha ay ahayd inay agaasimaan qorshaynta tabarrucaadka Soo-Guurtada ee ay ka midka noqon lahaayeen wasaaradaha isku noq-noqda ee Beeraha; Xannaanada Xoolaha iyo; Deegaanka & Horumarinta Reer Miyiga iyo Wasaaradda Caafimaadku meel ay hawl muuqata ku hayeen lamaannaan kulmin. Haddii laga tagi waayo waxaannu Wajaale kula kulannay qof noo sheegay inuu ka socdo Wasaaradda Caafimaadka



Sawir muujinaya agab la’aanta haysata Soo-Guurtada, sawir-qaade: Axmed Kadleye

oo noo sheegay inuu u yimid deegaanka si uu wax uga ogaado xaaaladda caafimaad ee Soo-guurtada. Waannu is waraysannay. Wuxuu aad u xiisaynayay arrimaha siyaasadda. War-bixin Soo-Guurtada nagamuu siinnin, annaguna maannaan weydiinnin. Waxaannu arkaynay inaanu xiisaynaynin.

Hay’adaha samafalka ee waqtiyada beeruhu innoo go’aan innoo keena raashinka caawimada ah, iyaga hadalkoodaba daa. Maalintii loo baahnaa lama hayo. Malaha waxa ay sugayaan marka dadku macalluulo ee laf iyo harag noqdaan, waxa laga yaabaa in aad is-weydiiso waayo. Waa waqtiga kaliya ee hay’adahani ku dawarsi tagi karaan dadka dhibaataysan, hadda ma aha ‘u dawarsi tagi doonaan!’

Soo-Guurtada aannu la kulannay waxay qaar ka mid ahi noo sheegeen inay ka yimaaddeen dad kale oo ah kuwii jilicsanaa oo ay inta badan uga yimaaddeen guryihii iyo in riyo ah oo irmaan. Dadkani waxay la soo guureen waa adhi ido u badan, geel, dameero iyo nafahoodii. Iduhu way gudhanyihiin, oo waa waqtigii naylaha lagu dari jiray, geeluna geel caano sidaa u buuran laga helayo umuu eekayn. Waxaas oo dhanna waxa kaga daran hu iyo hooy xumada, iyo dhulkay u soo guureen oo dayrta iyo jilaalkaba qabow daranni ka dhaco. Qul-qulka dadku weli wuu socdaa, jiilaalna weli wuu hadhsan yahay.

Sidaan hore u sheegay tirada dadkaa oo sugan lama hayo, xoolaha ay la soo hayaameenna iskaba daa. Tiro koobka dadka iyo xoolahoodu waa hawshii ugu horraysay ee la il duufay. Qorshe la’aantu waxay keentay inay dadku is dul daadsanaadaan. Bal dadkaa aannu la kullannay xaaladdooda aan dhowr tusaale ka soo qaato:

## Geeddi naf la caari ah

Waxa annu deegaanka u dhexeeya Xidhinta iyo Ijaara kula kulannay inan aan ku qiyaasay dhowr iyo labaatan jir iyo kuray ilaa 14 jir ah oo la guuraya woxoogaa adhi ah iyo saddex dameer oo u raran. Labada wiil kii roonaa baa wuxuu noo sheegay inay ka yimaaddeen deegaannada Balligubadle una socdeen deegaanka Ijaara, toddoba cishona soo socdeen oo ay la soo dhibtoodeen dameeraha u rarnaa oo tamar darri darteed ka fadhiisanayay. Wuxuu noo sheegay in ay dameerahaa kolba ruqaaminayeen.

Dameerihii oo markaa na yar dhaafay, intii aannu la hadlaynay, baan sii eegay. Waxan arkay inay dirqi ku socdaan.  Rarka saarraa oon sidaaba u buurrayn ayay la daalaa dhacayeen. Labada wiil qudhooda duruuf adag ayaa wejiyadooda ka muuqatay. Waxa saarnaa culayska mas'uuliyadeed ee reerahooda. Waxay badbaadinayeen xoolo u eekaa in aanay jiilaalka dhaafaynin. Xoolahaas iyo dameerahaas iyo iyaguba way isla il darraayeen. Qiyaastii dhowr saacadood oo dambe oo socod naf la caari ah baa u hadhsanaa.

Waxaa kaloo aannu isla deegaanka kula kulannay nin aan isna ku qiyaasay dhowr iyo labaatan jir oo watay tuldo geel ah. Salaan ka dib, waxa uu noo sheegay in uu ka yimid deegaannada Balligubadle. Ninkaa ishiisu ma xumayn, laakiin baahida haysay way qarsoonayd. Waxa aannu siinnay biyo yar oo mooya saxa ah iyo in raashina. Su'aashii labaad ee aannu weydiinnay intii aanu ka jawaabin ayuu biyihii isku qabtay. Ishaan ku hayn kari waayay. Markii uu biyihii laba jeer kabbaday buu noo jawaabay. Raashin yar oo kale (wixii aannu sidannay) oo aannu siiya is nidhi wuu naga diiday. Gobonnimo darteed!





Muuqaal muujinaya diifta abaarta, Sawir-qaade: Axmed kadleye



Sawir muujinaya xaaladda deegaanka ugu baadka ladan oo markaa gabaabsi ahaa, sawir-qaade: Axmed Kadleye

## Ciirsi la’

Waxaannu deegaanka u dhexeeya Dila iyo Kalabaydh kula kulannay Soo-Guurto ka soo hayaamay deegaannada Banka Tuuyo. Waxaa ka mid ahaa dadkaasi ruux dumar ah oo aan da’deeda ku qiyaasay kontomeeyo. Waxannu la kulanay iyadoo raadinaysay dameero ka lumay. Waa casar liiq. Waxay noogu cabatay “waxan ka baqayaa in dameerahaasi waraabe iga cuno’. Waxaa madaxayga ku soo dhacday heestii Xasan Cabdillahi Ganay ee ahayd:

Daan Bari adoo yaal

Cirkoo Doollo ka onkoday

Beeshoo ah doog-raac

Adna awrtu dabarli’i

Intooy kaaga daateen

Labadaadii aar diley

Dusha waxaad ka raratana

Kolay tahay dameer hayn

Heestan Xasan Ganay waxan u soo qaatay uun hal-qabsi eh, sawirka ay bixinaysay ee deegaanka abwaanku wax ku sifaynayay way ka duwan tahay ta deegaanka ay Soo-Guurtadu u soo hayaameen. Waa mid eh, dadkani may soo naq-raacin. Waa naf la caari. Dhulka loo soo guuray aan isla fahamno. Waxa meesha nooga muuqdaa waa geedaha la yidhaa sog-sogta iyo qudhac yacay ah oo wali sii qoyan, ama dhulka beeruhu ay weli sii leeyihiin xaab-xaabkii ka hadhay caleentii la jaray. Intaa ka sokow, dhulku badankiisa baad kale laguma oga oo waa xaaluf.

Dhib kalena waxay tahay in xoolihii dhulkii ka tiro bateen. Roobab hagaagsan oo ka da'ay ma jiro. Xataa haddii uu ka da'o waxa hubaal ah, itaalka xoolaha awgeed, in uu galaafan karo xoolo badan. Ruuxaa dumarka ahi waxay noo sheegtay in daruuro dhawaan helay ay adhi ka laayeen. Haddii ay roob la'aantu sidaa sii ahaatana adhigaasi wuu le'anayaa. Dhan walba markaad ka eegto Soo-Guurtadaa iyo caydhi way is huran yihiin, tii Alla se maqan.

Soo-Guurtada deegaannada Gabiley, Kalabaydh, Wajaale iyo Dila ee aannu marnay waxay ku xoonsanaayeen dhulka beeraha laga jaray iyo hareeraha waddooyinka magaalooyinkaa isku xidha. Inan yar oo geel la joogay oo aan ku qiyaasay inuu jiray labaataneeyo oo aan kula kulannay deegaanka Dila wuxuu marxaladda Soo-Guurtada ku sifeeyay: 'Guri, guri dul degay'. Wuxuu sifaynayay sida xooluhu isugu cidhiidhyeen meelaha baadku gabaabsiga yahay ee kooban. Uma malaynayo in wasaaradaha ay khusaysaa ka war hayaan inta neef ee deegaanka ay Soo-Guurtadu u soo hayaantay uu qaadi karo (*carrying capacity)*. Haddii ay taasi jiri lahayd, dadkaa is dul degay baa la kala qorshayn lahaa. Qorshe la'aan, aqoon darro iyo baahi ayaa is barkaday. Hay'adda cuntada ee FAO waxay fikradda 'carrying capacity' ku macnaysaa inta neef ee deegaan cayiman uu qaadi karo waqtiga baadku ugu liito. Waxay ku qiyaastay in neefku uu u baahan yahay inta u dhaxaysa 2.5% iyo 3.0% miisaankiisa oo xaab-xaab ah. Maannaan xisaabin xaab-xaabka deegaanka ay xooluhu ka heli karayeen – talo-galkayaga may ahayn, se qiyaasta hay'ada ee 2.5% iyo waxa u dhow toonina meesha noogama muuqannin.

Mar aannu isku daynay inaannu la kulanno mid ka mid ah wasaaradaha oo aannu ballan ka samaysannay Wasiirkii qaabbilsanaa, ballantii uu noo sameeyay muu oofinnin. Xog horumarka dalka muhiim u ah baannu ku tuhmaynay, arrimaha aan kor ku xusayna wax uga tilmaama ayay naga ahayd. Aan u cudur daaree, in ku dhow saacad iyo badh markii ay dhaaftay waqtigii ballanta ahayd buu nala soo hadlay si uu noogu sheego inuu ballan kale yeeshay. Waa qayb ka mid dhibaatada.

Aan u soo noqdee ruuxii dumarka ahaa cabasho kamay qabin is-dul-degidda iyo cidhiidhiga xooluhu isku hayaan, waxase hadalkeeda laga dhadhansanayay inay ku jirto xaalad 'ciirsi la'a'. Reerkeedii badh waxay kaga maqan yihiin sahan kale oo dhinaca Itoobiya ah, badh waxa laga yaabaa (waa siday u badan yihiin Soo-Guurtadu eh) in ay kaga soo guurtay deegaankii ay ka soo hayaantay, iyadana muur wixii ay wadatay baa kaga lumay deegaan aanay barigiisa iyo galbeedkiisa kala garanaynin; weliba waxay iigula muuqatay inay kambalka reerka kaga timid maati iyada ka sugaya inay wax la cuno dabka u saarto, waaba haddii ay wax loo dhar-dhaaraa u yaalleen. Waxa aannu siinnay dhowr xabbo oo roodhi ah oo badhna aannu soo iibinay, badhna ninkii aannu ka soo iibinnay oo magaalada Borama dukaan roodhiile ah ku haystay uu noo soo dhiibay markii aannu u sheegnay in aannu u wadno Soo-Guurtada. Waxay na waydiisatay bac ay roodhida ku qaadato. *Every little helps.* Waxay doonaysay inay labada gacmood midkood ugu bannaanaato hawsha sugaysay. Way deg-degsanayd. Waxa u hadhsanaa wax ka yar saacad inta aanu gabbalku dhicin inay ku hesho dameerihii. May sidannin toosh.

## Wax roob sheegaya?

Waxaannu deegaanka Banka Boqonta (ama Banka Bohol) ee u dhexeeya buuralayda Dawga Cad kula kulannay nin gacanta noo haadiyay. Waannu u joogsannay. Salaan ka dib waxa uu na waydiiyay: 'waar makhaayadda maydin i sii gaadhsiin, haddaad kartaan? Gaadhigaannu ku soo qaadnay. Waannu waraysannay. Wuxuu noo sheegay inay ahaayeen afar qoys oo watay laba tiro oo adhi ah iyo in ay dhexda ku soo jireen toddoba habeen.

Deegaankan waxa ku dhow buuraley la yidhaa Geeri-Go'anka Cas. Bankaa uu ninkaa Soo-Guurtada ah iyo ciddii la socotay u soo guureen aniga xaggayga sawirkaan meesha ka qaatay kama duwanayn inay wada geeri-go'an yihiin. Waanse qaldanaan karaa oo waxa la ii sheegay inay waqiga Gu'ga ee dhulku barwaaaqaysan yahay uu deegaanka banka ah iyo buuraleydan ku geedaamanba adhigu caddeeyo, duur-joogta ay ka midka yihiin cawsha iyo deeraduna sidoo kale. Taasise waa kal hore. Aniga macno iimay samaynaynin, cidaha ku noolna waxay malahayga ula muuqatay xasuus fog. Waxaa ka xaasil ah abaarta hadda taagan oo u muuqata mid daba dheeraanaysa.

Waxa naxdin lahayd in deegaankaa banka ah ee ninkaa aannu gaadhiga u joojinnay iyo intii la socotay ay u soo guureen, dadkii rasmi u degganaa ay hore uga hayaameen. Ninkaa laftiisu meesha kumuu qanacsanayn. Wuxuu na weydiiyay in roob aannu ku soo aragnay dhulkii aannu soo marnay ee dhinaca xeebta oo aannu markaa ka nimid. Waxaannu u sheegnay in aannu maqallay in dhinaca xeebta Bullaxaar wax lagu sheegay, laakiin waxa aanu intaa ugu darnay 'sahan la'aan ha guurina'. Waayo, warkayaga ma aannaan hubin. Kollay isba muu guureene, maxaa kale ee noo bannaanaa?

Soo-Guurto markaas uun gaadhigii siday ku rogay banka Wajaale oo waayuhu laba-dibleeyay, sawir-qaade: Axmed Kadleye



Makhaayaddii uu sheegayay waxay noqotay meel dariiqa agtiisa ah oo malaha dhowr cisho ka kor gole laga ooday oo ay siddeed ilaa toban rag ahi shaah ku karsanayaan. Waa fiid cawl. Makhaayaddani – anoo tiisa raacaya – waa meesha ay Soo-Guurtadani ku kala war qaadanayeen baan is nidhi.

Ma aannaan dhegaysanin is waraysigooda oo qudhayadaa carraaba ku jirnay, waxanse hubaa in is-waraysigoodu u badnaa inay jawaabo u helaan su'aasha noloshooda udub dhexaadka u ah: waar halkee biyo iyo baad innoogu dhow? Su'aashaasi waxay taagnayd dhaqan-dhaqaalaheena inta la xasuusan yahay. Welina waa loo maara laaya'ay.

Su'aasha a "waar marka cirku da'o sideen uga faa'idaysannaa biyaha innaga khasaara?" cid is weydiisaa ma jirto. Abaartu kuma koobna roob li'i. Waxa jirta arrin li'i, imika se waqti la is canaanto ma taagna oon ka ahayn sideen dadkeenna iyo duunyadeena u badbaadinnaa horta. Soo-Guurtada iyaga wax ay awooddoodu ku soo ururtay in ay cirka kor eegaan uun iyo in ay dhulka hoos u eegaan. Ninku telefoonka gacanta lagu qaato ayuu sitaa. Waa kay ku kala war qaataan marka aanay golaha ("makhaayadda") wada joogin. Waxay ka dabaystaan – waa sida nin kale oo Soo-Guurto ahi noo sheegaye – meelaha tuulooyinka oo ay ka helaan dabka cadceeddu dhaliso. Lacag lagama qaado. Gobsanaa dadkeennu!

## Raq-la-soo-guur

Waxa aannu deegaanka banka Wajaale oo aannu maraynay waqti duhurka dabadii ah kula kulannay laba wiil iyo inan yar oo markaas uun gaadhigii ay ku soo guureen meesha ku rogay. Waannu waraysannay. Waxay noo sheegeen in ahaayeen laba qoys oo laga soo qaaday ku dhawaad £1000. Adhigaa ay kala soo hayaameen Bari markii uu soo gaadhay meeshii ay u socdeen in badan ka dhimatay; qaarna intii ay dhexda ku soo jiren ayay dhinteen; inta meesha nolol ku soo gaadhayna umay eekayn in ay maalmo sii noolaanayaan. Lax kici kari la' oo tiillay meel ciid ah baannu aniga iyo qof ila socday qaadnay. Waxa aannu fadhiisinnay meel jirridihii daaqu weli sii muuqdaan. Laxdii afkay dhulka la boobtay, waxay durbadiiba bilowday in ay iyadoo fadhida jirridihii hareereheeda ka dhawaa xididdada u saarto. Reerkaa aannu meesha kula kulannay rajo kamay qabin in laxdaa iyo qaar kale oo dhulka daadsanaa ay sii noolaanayaan, waxna kamany qaban karaynin – duruufahaa laba-dibleeyey. Marbayse idahaasiba hanti ahaayeen, oo gashi lahaayeen. Waxa igu soo dhacday haddii markaa la qalan lahaa sidan umay khasaareen.



Sawir-qaade: Axmed Kadleye

Mar aan weydiiyay dumar Soo-Guurto ah oo aannu laba maalmood ka hor kula kulannay deegaanka Waddo-Makaahiil oo Hargaysa oogo-galbeed kaga beeggan waxay adhyaha u shidhaysan waayeen ka hor intii aanay sidaan ku arkayay uga raqoobin. Su'aashaydii way u dhadhami wayday. Runtii waabay qosleen iyagoo isku leh 'kani film buu wadaa'. Iga dheh igamay ahayn, waxa ii muuqday, iyaga kamuu qarsoonayn: wey ogaayeen in Jiilaal weli dambeeyo, in ay u eeg tahay in – tii Ilaahayna maqane – abaartu daba dheeraanayso iyo in haddii ay sidaa u dhacdana in badan oo adhyohooda ahi le'anayaan. Waxay iga ahayd uun intii ay abaaari dili lahayd iyagoo qasha inta neefku wali dux leeyahay baa malaha ka habboonayd. Laakiin ilamay garowsan in adhyahaasi markay gashiga lahaayeen laga heli lahaa hilib ay carruurtooda iyo reerahooda ku jiilaal-bixiyaan. Ruux dumar ah oo aannu kula kulannay tuulada Illinta Dhexe oo woqooyiga ka xigta Hargaysa oo aan isla su'aashaa ku celiyay waxay iyadu igu tidhi: 'wallaahi taasi ma ba aannaan ka fikirin'.

In badan oo sida saamaynta abaarta loola tacaali karaa waa fikir ama dhaqan. Marka sidan oo kale xaalad adagi la soo daristo xoolo dhaqatada waddamada qaar waxay sameeyaan wax la yidhaa '*de-stocking*', oo lagu yareeyo xoolaha guud si inta kooban loo badbaadiyo.

Aan u soo noqto Soo-Guurtadii Wajaale kula kulannay, waqitugu waa duhur dabadii. Ma joogaan goor ay xoolaha xero ugu ootaan (xasuusnow waa ban aan geedo wax lagu ootaa u dhawayn) ama ay iyagu ku samaystaan gabbaad ay caawa dhaxanta ka dugsadaan. Banka waxa ka dhacda qabow loo yaqaan *hamadday* oo aan waddanka intiisa kale ka dhicin. Waxan eegay laba dumar ah oo ku jiray Soo-Guurtadaa: waa inan yar oo aan ku qiyaasay ilaa afar iyo toban jir iyo hooyadeed oo mar dambe nagu soo biirtay markay sheeda ka aragtay annagoo la hadlayna inantaa iyo labada wiil oo ay la joogtay. Waxa madaxayga ku soo dhacday kuwa hu iyo meel ay dhaxanta banka ka galaan caawa u baahani waa kuwan. Dowladda Hoose ee Degmada Wajaale oo aannu duhurkii hortii yar joognay waxaannu ku soo aragnay 15,000 oo salliyada la goglado ah (qiyaastaa waxa na siiyay Xoghayaha Degmada) oo ku jiray istoodhka xafiiskaasi. Waxa na loo sheegay in salliyadaa la keenay xalay looguna talo galay Soo-Guurtada. Laakiin hawsha muhiimka ahayd ee ay markaasi madaxda degmada Wajaale ku mashquulsanaayeen waxay ahayd gubidda xashiishka yaaalla togga magaalada. Hawl adduun ma dhammaato.



Salliyo ku xeraysan istoodhka dawladda hoose ee magaalada Wajaale, sawir-qaade: Axmed Kadleye

Gargaarka dadka tabaalaysan la siiyaa inta badan wuxuu ku dambeeyaa *too little too late.* Waxa igu soo dhacday in habeen kasta oo salliyadaasi ku baaqdaan istoodhka ay dad cawro iyo maati ahi hoy iyo hu la'aan banka u jiifaan. Intii aannu deegaannadaa loo soo guuray maraynay, la maannaan kulmin taakulanyta deg-degga ah (*emergency assistance*) ee ay tahay in la siiyo dadkaa Soo-Guurtada ah. Waa laga yaabaa in hawli socotay oo aannaan annagu la kulmin, ama fikirka ah fidinta gar-gaarka deg-degga ah ayaan dadkeennu ku baraarugsanayn: wixii la helo goortii la haleelo ayaa dadka loo qaybiyaa. (Waxa se haboon in aan qiro in dadkeennu ku baraarugsan yihiin is marti-gelinta.)

## Macalluuli waa ina daan weyne

Xooluhu haba iska liiteene, dadka aannu la kulannay weli ishoodu may xumayn. Biyuhu haba la helee, deegaannadaa ay Soo-Guurtadu soo degtay baadkiisu waa gabaabsi. Dhibaato ka badan inta ili-qabatayga ah oo ay kuu sheegayaanna ma jirto. "Adba waad aragtaaye, maxaad iga waysan". Markaadse dhaafto waraysiga guud ee aad eegto xaalufka ka muuqda deegaanka ay u soo guureen iyo sida jiilaal u hadhsan yahay, su'aasha ah "talow siday wax ku dambayn?" marnaba kama baxsanaysid inaad is weydiiso. Waxa aannu dadkani la kulannay waa badhtamihii Diisambar 2016 oo na loogu sheegay. Weli waxa hadhsan jiilaal oo dhan. Jiilaalka roob da'a umaynaan baran, tii Ilaahayse maqan. Markaa adba waad qiyaasi kartaa waayaha adag ee horyaala dadkeennan soo guuray.

Waxa aan ku qiyaasay in xoolahaa dadkaasi wateen badankiisu sida uu jiilaalkaa kaga baxayaa ay aad u adag tahay – mucjiso Allah waa halkeeda. Degaankani mid ay Soo-Guurtadu ku sii negaayaan uma eekayn. Waxay dadka qaarkii noo sheegeen inay dhinaca Ethiopia laga yaabo in ay u sii gudbaan.

Waxaa na loo sheegay in maalintii ay saddex boqol oo gaadhi oo daabulaya maan-dooriyaha loo yaqaanno jaadku ay ka soo gudbaan Ethiopia oo ay Wajaale ka soo galaan Jamhuuriyadda. Tiradaasi waa uun qiyaas uu na siiyay ganacsade deggan magaalada Wajaale. Wax badan ha ka soo qaadin. Waxaan u soo qaatay in aan sawir ka bixiyo baaxadda ay le'eg tahay 'balkan/caleentan' habaar qabtada ah ee ay dadka Jamhuuriyaddu soo daabushaan iyo lacagta ku baxda. Waxa madaxayga ku soo dhacday 'malaha 300 gaadhi oo bal (caleen) maalinle ahi xoolaha Soo-Guurtada way jiilaal-bixi kari lahaayeen'. Malahaasi aniga ima dhaafsana. Waxanse is weydiisay talow Ethiopia ma ogolaan lahayd inaynu balkaa waddankeeda ka soo iibsanno?

Abaartu xad ma taqaannee, talow sidee baadka iyo biyuhu yihiin xadka dhinaciisa kale? Su'aashaa dambe jawaabteeda waxa iga hor heli doonta ruuxii dumarka ahaa ee Dila iyo Kalabaydh dhexdooda ka baadi goobaysay dameeraha ka lumay. Waa tii noo sheegtay inay ka war sugaysay sahan ay u dirsadeen Ethiopia. Xataa haddii baad iyo biyo lagu sheego meel kale, dadka iyo duunyada noolamay muuqannin kuwo awoodayay inay mar dambe awoodi karaya inay hayaan kale galaan. Xaalkoodu wirriiri buu ahaa. Markaa malahayga iyo kii asxaabtii ila socotayba waxaan ka gayeyn weeyney in macalluuli ina daan weyne tahay, tii Alle uun bay se noqon!

## Beesha la hab-dhaqan sooco

Shicibka Jamhuuriyaddu waa beelo isku tagay. Siday awoodaha siyaasadeed iyo kuwa dhaqaale ugu kala dhow yihiin ayay u kala ladan yihiin. Beel kastaaba waxay leedahay salaaddiin la yaqaan iyo qaar la yidhaa af-ku-xooglayaal. Shan iyo labantankii sanno ee ay Jamhuuriyaddu jirtay beelahaas mid kastoo ka mid ahi, mid mooyee, shaadh le'eg bay tolatay ama loo tolay. Beesha aan shaadh tolannin ama aan loo tolin waa beesha xoolo dhaqatada. Jamhuuriyaddu waxay ku hawl gashaa siyaasad u janjeedha dadka deggan magaalooyinka. Waddama badan oo caalamka soo koraya ah waxa ragaadiyay siyaasadda la yidhaa *pro-urban bias policy*.

Beesha xoolo dhaqatadu cudud siyaasadeed ma laha. Cadkooda ma goosan karaan, codkoodu ma midaysna, cidina uma hagar baxdo. Waa beel la hab-dhaqan sooco; nasiib darrona waa beesha beesha Soo-Guurtadu ka tirsan tahay.

## Haddii aad tahay qurbo joog, maxaad dadkaa u qaban kartaa?

Degmooyinka Jamhuuriyadda badankooda waxa ka dhisan guddi loo xilsaaray abaaraha. Waxase kale oo aad samayn kartaa in aad waxa aad awoodi karto ku hagaajiso cid aad ku kalsoon tahay oo sadaqadaada toos u gaadhsiisa dadka kuwa ugu baahan, ugu jicilsan: caruurta iyo cawradeenna dhaxanta wadhan, khaasatan kuwa ka fog dariiqyada ay wufuuddu marto.
Damiirkaaga la tasho.

***Dr Maxamed Obsiye***
*London*
*UK*
*2017*